



Bulshada Grant waxaa ka go'an inay kobciso jawi loo wada dhan yahay, oo leh aqbalaad. Waxaa jira dhaqammo taariikhii hodan ah iyo waliba u heellan sahaminta tekniyoolajiyadaha cusub iyo caadooyinka ka tarjumaya adduunkeenna weligiis isbeddelaya. Grant waa dugsi sare oo kaladuwan oo firfircooni, dhammaystiranna.

Waxaan aaminsanahay in ardayda oo dhammi ay guuleysan karaan waxaana naga go'an inaan hubinno in arday walba uu diyaar u yahay holosha, shaqada iyo barashada wixii ka dambeeyaa dugsiga sare. Grant waxay bixisa noocyoo kala duwan oo muhiim ah, xulasho, AP, koorsooyin kuleejada ee laba dhibcoodka ah, iyo koorsooyin waxbarasho xirfadeed-farsamo.

Tusmooyinka Grant

- Bulshooyinka Fasalka 9aad:** Dhammaan ardayda dhigata fasalka 9aad waxay ka tirsan yihiin bulsho oo barteyaal ah. Bulsho kasta waxaa ka mid ah Farshaxanka Luuqadda, NGSS Fisikis iyo Baaritaanka Fasalka 9aad. Intaa waxaa dheer, ardayda fasalka 9aad waxay qaataan koorsooyin kale oo muhiim ah waxayna kala doortaan xulashooyin kala duwan.
- Koorsooyinka Meelaynta Sare waxaa ka mid ah:** Juqraafiga Aadanaha **dhammaan** ardayda fasalka 10aad, Bayoolaji, Kimistariga, Fiisigiska, Kalkalus, Sayniska Bey'ada, Taariikhda Yurub, iyo Farshaxanka Istuuudiyaha.
- Koorsooyinka PSU iyo PCC labo-dhibcoolaha ah waxaa ka mid ah:** Magaalada Duni, Ilbaxnimada Dunida, Dumarka iyo Daraasaadka Jinsiga, Suugaanta Afrikaanka Mareykanka, Suugaanta Latin Amerika, Mawduucyada Suugaanta, Xogta iyo Tirakoobka, Suurtagalnimada iyo Tirakoobka, Saxaafadda, Isbaanishka, Tiyaatarka iyo Tababarka Maktabadda. Dhamaan dhalinyarada iyo waayeelka waxay qaataan Ingiriis laba dhibcood ah.
- Grant wuxuu leeyahay daabacad abaalmarin heshay eee ardaydu oo lagu magacaabo *Grant Magazine* oo hadda 10 sano shaqeynyeysa. Qorayaasha shaqaalaha majaladda waxay ka kasban karaan dhibcaha saxafinimada kuleejada PSU. Waxay ku guuleysteen lix abaalmarin oo dahab ah oo is-xiga oo laga helay Columbia Scholastic Press Association.
- Grant's ConTeam (Kooxda Dastuurka) wuxuu ku guuleystay Qaranka seddex jeer: 2013, 2015, 2018 oo wuxuu ku guuleystey tartanka gobolka Oregon 12 jeer tan iyo markii aan bilowney tartamida sanad dugsiyeedka 2000-2001.
- Grant waxaa ka go'an inay bixiso sinnaanta dhammaan dhinacyada bulshada dugsiga. Ardaydu waxay door muhiim ah ka ciyaareen ku darista koorsooyin dhowr ah oo la xiriira midabka iyo dhaqanka waxayna ka caawiyaa qorsheynta Wadahadallada Jinsiyadaha ee dugsiga afar jeer sanadkiiba.

Barashada Kuleejada iyo Xirfadda

Grant's College and xarunta Xirfadda waxay la shaqaysaa Waaxda La-talinta si ay uga caawiso hagida ardayda markay u diyaar garoobayaan mustaqbalka. Isuduwaha Xirfadaha iyo waalidiin mutadawicin ah ayaa ka shaqeeya xarunta dhigista waxayna bixiyaan macluumaaad ku saabsan shaqooyinka iyo dariiqooyinka lagu helo shaqooyinkas. Xarunta Xirfadda waxay bixisa macluumaaad kusaabsan kuleejyada, jaamacadaha, tababarrada xirfadda iyo/ama barnaamijyada tababarka shaqaalaha. Xarunta Xirfadda way furan tahay maalin kasta waxayna siisa fursad ay ku helaan wakiilo kulleje ah oo boqda Grant sanadka oo dhan. Waxa kale oo jira fursado sannadka oo dhan ah oo loogu talagalay sahaminta xirfadeed - hadal martiyeedka, boqashooyinka xirfadeed ee ka baxsan, shaqo beenayda iyo tababaro.

James
McGee
Mamule



Scott
Roosevelt
Maamule
Xige
(Manhajka)



Joe
Mitacek
Maamule
Xige
(Adeegyad
a Ardayga)



Robyn
Griffiths
Maamule
Xige
(Adeegyad
a Ardayga)



Barnaamijyada Barashada Farsamada ee Xirfada (CTE)

Barnaamijyada Waxbarashada Farsamada ee Xirfadaha waxay ardayda siinayaan fursadaha xirfadeed ee Qarniga 21-aad ee barashada tooska ah ee fasalka. Ardaydu waxay bartaan xirfado farsamo oo ay weheliyaan macluumaadka ku saabsan shaqooyinka ka dhex jira qeybta waxbarashada. Koorsooyinka qaar waxay bixiyaan dhibcoouin kuleej, safarada dibada, tababaro, booqashooyinka goobaha shaqada iyo fursadaha kale ee tooska ah. Waxaan bixinnaa barnaamijyo badan oo CTE ah oo daraasadeed Barnaamijyadeenna waxaa ka mid ah:

Naqshadeynta 3D and Farshaxan dabaqan, Injineernimada Dhawaaqa, Maareynta Ganacsiga, Sayniska Kombuyutarka, Dhismaha, warbaahinta Dijitalalka, Injineernimada iyo Robotikada, Sayniska Caafimaadka, iyo Farshaxanka Warbaahinta/Tiyaatarka.



Ciyaaraha Fudud iyo Waxqabadyada

- Tartanka 6A Ciyaaraha fudud:** Beesbaal, Kubadda Koleyga, Sacab tunka, Orod tanka, Kooxda Qoob-ka-ciyaarka, Kubadda Gacanta, Golofka, Kubadda Cagta, Kubadda Jilicsan, Dabaasha, Teeniska, Waddada iyo Garoonka, Kubadda Laliska iyo Legdinta.
- Isboortiga Midaysan:** Wuxaan bixinnaa seddex isboorti oo loo maro Olombikada Gaarka ah ee Oregon - kubbadda cagta, kubbadda koleyga, iyo kubbadda jilicsan. Isboortiga Midaysan waa barnaamij isku daraya tirooyin isku mid ah oo ciyaartooya Olombikada Gaarka ah iyo la-hawlgalayaasha mideysan ee kooxaha isboortiga ee tababarka iyo tartanka.



© Benjamin Benschneider



- Naadiyada:** Grant waxay leedahay in ka badan 100 naadi oo ku saleysan xiisaha ardayda, oo ay ku jiraan: Midowga Ardayda Madow, Ururka Ardayda Asaliga ah, Naadiga Aasiya-Baasifigayaasha Jasiiradaha, MEChA, Bulshada Sharaftha Qaranka, Isbahaysiga Queer Straight, Midowga Ardayda Bariga Dhexe/Carabta, Caddaaladda Cimilada, Naadiga bey'ada, Naadiga Sinaaanta, Naadiga Kalluumeyisiga, Lakroos, Ragbi, Doon-riix, Baraf sibiq, Barak ku socod, Ciyaarta Biyaha kiyo kuwa kale oo badan.

Bandhig Faneed iyo Farshaxan Muuqaal

- Bandeeyda Simfooningga
- Kooxaha Jazz, Afuu iyo baakaashan
- Koox-heesaadyo- Koox-heesaad saddex ah, Kooxaha Ragga Akabella, Royal Blues
- Tiyaatarka Riwaayadaha iyo Muusikada
- Qoob-ka-Ciyaarka Bilowga, Dhixaadka iyo Sare
- U qorista Farshaxanka
- Aasaaska Farshaxanka, Sawir-dhoobada, Daabacaadda (Printmaking)
- Sawir-qaadid
- Naqshadayaasha Garaafka
- Istuudiyaasha Farshaxanka Sare
- Tiyaatarka Caruurta
- Naqshadeynta Dhismaha
- Warbaahinta Dijitalka ah
- Daabacaadda Shaashadda

Xerada

Si cusub loo casriyeeyay-

Waxaan ku laabannay xeradeena la casriyeeyay. Xaruntan waxaa ka mid ah Teknoolojiyadda Qarniga 21-aad, goobo casri ah oo loogu talagalay ardayda iyo shaqaalaha, iyo jawi waxbarasho oo u muujinaya daryeele dhammaan xubnaha bulshada. Casriyeeynta ayaa si ula kac ah loogu talagalay in lagu muujiyo oo la ilaaliyo taariikhdeena hodanka ah iyo in la bixiyo xarumaha csri oo farshaxan. Wuxaan ugu mahadnaqaynaa bulshada Portland taageerada ay siisay dugsiyadeena.